**Barashada afka noorwiijiga iyo culuunta bulshada oo bilaash ah**

**Xaqqa barasho af noorwiiji iyo culuunta bulshada oo bilaash ah**

Ogolaanshaha deggenaanshahaaga Noorwey waxa uu xaq ku siin karaa isugayn ah 600 oo saacadood oo ah barrida

- Af noorwiijiga (550 saacadood), iyo
- Culuunta bulshada ( 50 saacadood ah)

Waxbariddu waa bilaash mudo sedex sano ah

- Laga bilaabo markii lagu siiyay ogolaansho deggenaan, ama
- Laga bilaabo markaad timid Noorwey adoo heysta ogolaansho deggenaansho

Haddii aadan billabin ama aadan dhamaynin waxbarashada saddexdaa sano guduhooda, waa in aad adiga iska bixisaa waxbarashada

**Waajib ah barashada noorwiijiga iyo culuunta bulshada**

Waxa waajibaad kaa saarnaan karaa inaad dhameysato 600 saacadood oo ah barashada noorwiijiga iyo culuunta bulshada, si laguu siiyo hadaad codsato

- ogolaansho degenaansho, ama
- jinsiyad

Waxaad codsankartaa in lagaa qaado waajibaadka waxbarida hadaad

- caddeyn karto inaad u leedahay aqoon kugu filan luuqada noorwiijiga ama tan saamiga ah, ama
- hadey jirto xaalad gaara oo caafimaad ama sababo kale oo adkeynaya waxbarashada.

**Warbixin faa'iido leh**

Waa inaad adiga la xiriirtaa goobta waxbarashada dadka waaweyn ee gobolka aad ka diwaangashantahay, si aad u codsato waxbarashada, ama hadaad dooneyso inaad codsato in lagaa qaado waajibka waxbarashada. Haddaad qabtid su'aal ama aad u baahantahay warbixin ku saabsan waqtiyada kama dambeynta ah iyo xuquuqaha, la xiriir goobta waxbarashada dadka waaweyn

Waxaad sidoo kale warbixin ka heli kartaa shabakadaha [www.imdi.no](http://www.imdi.no) iyo [www.udi.no](http://www.udi.no)